# XASUUQII KALSHIIKH

Marka ugu horreysa waxaan salaan ,hambalyo iyo taageero u soo dirayaa webka Farshaxan .Waa dhallinyarada habeen iyo maalinba u heelan inay baraarujiyaan, isla markaana xusaan, gabood falkii loo geystay dadkan reer Somaliland, iyadoo cadowga Somaliland isku dayayo inuu tirtiro taariikhdii dadkan, iyo dambiyadii laga galayba, waxaan Illaahay idiinka rajeynayaa inuu hawshan idiin fududeeyo, annaguna waxaan idiinla garab taagan nahay hiil iyo hoo aan hagar lahayn, taariikhduna waa idin xusi doontaa mar aan fogayn.

Waxaan jecellahay inaan halkan idiinku soo gudbiyo, xasuuqii ka dhacay tuulada Kalshiikh,Ceerigaabo iyo magacyadii illaa imminka isoo gaadhay, waxaan filayaa inay bilow fiican innoo tahay, wixii kalena waan soo dhammaystiri doonaa, annagoo isku dayayna inaan ka soo qaado, sawiro, iyo waraysiyo maqal iyo muuqaal ah, dadkii ka badbaaday xasuuqyadaa kala duwan, una soo taagnaa markii la dilayey dadkooda. Waxaan hayaa qaar ka mid ah magacyadii dadkii geystay xasuuqa iyo kuwii ka dambeeyey ee abaabulayey, waxaana imminka London jooga nin ugu yaraan 10 qof ku dilay Cerigaabo.

Mahadsanidin.

# XASUUQII TUULADA KALSHIIKH

# OKTOBER 1988


Xasuuqii tuulada Kalshikh ee taariikhdiisu aheyd Oktoober 1988,waxaa dadka lagu gumaadey halkaa tiradoodu ahaayeen 44 nin.Waxaa laga ururiyey tuulada laguna ururiyey iska rogo , markii dadkaas la geeyey meel u dhaw dhiska weyn ee la yiraahdo Kalshiikh iyo Ceelaf, ayaa la dalacay iska rogadii laguna bilaabay tacshiirado rasaas ah .Waxaa tirada halkaa ku qudhbaxday oo dhamayed 44 nin, waxaa ka badbaaday laba nin oo tirade markaa ka dhigaya 46 nin. Labadan qof ka hore wuu cararey , ka kalena markii danbaa laga dhex helay meydkii .

Hadaba dadkaas oo isugu jira dad u dhashay tuulada iyo dad socoto ah way ii suuta gali wayday in aan magacyadooda helo balse waxaan helay intan hoos ku qoran:


| | |
|---|---|
| 1. C/laahi Cabdi Jibriil ( Sawaaxili). | Basan buur/Biciide/H.Jeclo |
| 2. Salax Dhunkaal Xirsi . | Basan buur/Biciide/H.Jeclo |
| 3. Cabdi Cumar Maxamed . | Basab buur/Biciide/H.Jeclo |
| 4. Yusuf Xasan Ducaale. | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 5. Aadan Jamac Cabdi (Ganaax). | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 6. Cabdi Cabdilaahi Ducaale . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 7. Saleebaan Dhunkaal Xirsi . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 8. C/risaaq Maxamed Salax . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 9. Maxamuud Cawil Axmed . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 10. Maxamed Axmed Xaashi .(Garaase) | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 11. Maxamed Xasan Diiriye . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 12. Cawil Axmed Xasan (Walaac). | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 13. Cali Ibraahim Diiriye . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 14. Siciid Axmed Xasan . | Basanbuur/Biciide/H.Jeclo |
| 15. Cilmi Cabdi Diiriye . | Muuse Carre / H.Yonis |

| | |
|---|---|
| 16. Xuseen Farax Cabdi . | Muuse Carre / H.Yonis |
| 17. Muuse Xayir Ducaale . | Reer Yonis / H.Jeclo |
| 18. Maxamed Shire Mire . | Axmed Farah/Biciide/H.Jeclo |
| 19. Cali Cabdi Ibraahim. | Axmed Farah/Biciide/H.Jeclo |
| 20. Muuse Abokor Xasan . | Axmed Farah/Biciide/H.Jeclo |
| 21. Ibraahim Xasan yusuf . | Muuse Tuurwaa / H.Yonis |
| 22. Salax Dhunkaal Cabdi ( Dheere ) | Reer Iidle / Biciide / H.Jeclo |
| 23. Shiine Xasan Xuseen . | Aduruxmiin / H. Jeclo |
| 24. Abyan Diiriye Magan . | Axmed Farah/ Biciide / H.Jeclo |
| 25. Faysal Bulaale Gabaydhe. | Iidle Biciide/H Jeclo |
| 26. Mustafe Cabdi Jamac . | Lama hubo heybtiisa |
| 27. Dalmar Cabdi Cali (Dhega Cade ) . | “ “ “” |
| 28. Bakool | Dhulbahante / Daarood |

Sababta loo laayey dadkaasi waxay ahayd, ka dib markii gaadhi kuwa dagaalka ah oo loo yaqaan Bee Bee ama (APC) ay miino kula kacday meel u dhow tuulada, halkaasi oo ay ku dhinteen dhammaan siddeedii qof ee la socotay, uuna hoggaaminayey laba xiddigle la odhan jiray SHUKRI oo ka soo jeeday qabiilka Ogaadeenka, ciidamada xasuuqaa ku kacay, waxay u badnaayeen Ogaadeen u aarayey Shukri iyo intii la socotay.




Ahmed Hussein Omar, oo kor ka muuqdo musawirkiisa oo laga soo qaaday 2004ka, wuxuu ku dhuuntay tuulada markii dadkaasi dhintay la ururinayey oo lagu gurayey iskarogada.




Sawirkani waa Xeyraan Kaar Hussein, oo ka badbaaday xasuuqii Kalshiikh, wali waxaa saamayn weyn ku samaysay, xasuuqaa, mana jecla inuu ka hadlo, waxaanse dhowaan ka soo qaadi doonaa waraysi maqal iyo muuqaalba leh.

## MAHAD GAAR AH:

Waxaan mahad gaar ah u ah u soo jeedinayaa, dhammaan dadkii ka qayb qaatay ururinta magacyada dadkii lagu xasuuqay Somaliland iskuna hawla, gaar ahaan kuwan gobolka Sanaag oo kala ah:

Abdi Hassan Cabsiiye – Weriyaha Haatuf ee gobolka Sanaag, oo isagu aad isugu hawlay, inuu helo dhammaan magacyada dadkaasi xasuuqa foosha xun loo geystay, isla markaana Abdi Hassan Cabsiiye, waxaan mar kale u soo diraynaa isaga inta kale oo ehelkooda lagu xasuuqay Cerigabo iyo Ceelafweyn ( waxaa ku jiray dadkii Cerigabo lagu dilay walalkii Faysal Hassan Cabsiiye, ahaana arday 18 jir ah) waxaan leenahay Abdi halkaa ka wad halganka illaa maxkamad la keeno, dambiilayaashii dhagar-qabayaashii, baabi'iyey qoysas badan rajadoodii mustaqbalka iyo nolol caadi ah inay ku noolaadeen.

Waxaan kale oo u mahadnaqaynaa Naaleeye Aadan, oo soo diaries Xasuuqii ka dhacay BOHOL, deganna dalka Canada ee North America.

Waxaan kale oo u mahadnaqaynaa Website yada kala ah: Farshaxan, SomalilandCenter, Halgannews, oo soo daabacay, iskuna mashquuliyey inay helaan wararka xasuuqyadii ka dhacay Somaliland.
Well done you all

CODSI: Waxaan ka codsanaynaa cid kasta oo wax ku kordhin karta magacyada dadkii lagu xasuuqay gobolka Sanaag meelo kala duwan oo ka mid ah sida: Cerigabo, Ceelafweyn, Bohol, Dararweyne, Xamilka, Bohol, Kalshiikh, iyo dhammaan dhulka miyiga iyo Ceelashaba, inay la soo

xidhiidhaan website ka farshaxan.com

Mahadsanidin

Mustafa Salah
London
UK